



War Saxaafadeed ka soo baxay Dalladda Daneeyayaasha aan Dawlga ahayn ee PUNSAA

Tr. 28/06/2016

Dalladda Daneeyayaasha aan Dawlga ahayn ee PUNSAA waxa ay soo dhoweeynaysaa go'aankii ay Dawladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ahi dib uga laabteen guddigii doorashada 2016 ee ay hore u magaacaabeen. Ka laabashada go'aanka oo ka soo baxay shirkii madasha wada tashiga heer Qaran ee 25 June 2016 lagu soo gabagabeeyey magaalada Baydhabo. Guddigaas oo xubnihiisa ay u badanaayeen wasiiro, xildhibaano iyo xubno dowladda u xagliya.

Dalladdu waxa ay u mahad celineysaa beesha caalamka oo door ka qaadatay sidii guddigaas loo bedelo lahaa, iyadoo ay u arkeen in uu baalmarsan yahay sidii la doonayey in uu guddigu ahaado. Hase yeeshee waxay bulshada rayidka ahi ay ka walaacsan tahay in xubnaha guddiga cusubi ay noqdaan hooska kuwii la bedelay maadaama ay madaxda dawladda federaalka iyo madaxda dawlad goboleedyada xubnaha ka ahi ay soo magacaabayaan.

Sidaas darteed waxaanu masuuliyiinta Dawladda Federaalka iyo Dawlad goboleedyada ugu baaqaynaa in ay xurmeeyaan rabitaanka shacabka oo ay guddiga u magacaabaan xubno bulshadu ay raali ku noqoto. Waxaanu ugu yeeraynaa madaxda Dawladda in ay hawsha doorashada loo dhiibaan xubno ka tirsan bulshada rayidka ah oo lagu soo xulo aqoon, dhexdhexaadnimo, daacadnimo iyo firfircooni. Haddii guddigii hore lagu bedelo kuwo aan kuwii hore ka ood fageyn hannaanka doorashadana laga dhigo mid lagu danaysto waxa dhacaysa in bulshada ay ku gacan saydhidoonto.

Dhinaca kale waxa Dalladda PUNSAA ay ka soo horjeedaa hannaanka lagu soo xulayo 51 qof ee dooranaya xubnaha barlamaanka. Dalka waxa degan beelo badan, haddii beelo gaar ah la siiyey xubin barlamaanka ah nalama qumana in isla beeshii laga soo xulo 51 qof ee wax dooranaya. Ma aha waxa qurux badan oo caqligu ogolyahay in xubnaha barlamaanka ay doortaan isla beelaha ay xubnuhu ka soo jeedaan oo beelaha kale ay bannaanka ka joogaan doorashada guud ahaan.

Dawladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah waxaan ugu baaqayna in hannaanka doorashada laga dhigo mid dadka wada gaara ee aanu noqon mid qayb gaar ah ku khaas ah. Si arintaas loo daaweeyo waxa Bulshada Rayidka ah ee PUNSAA ku talinaysaa in 51 qof ee dooranaya xildhibaanka ay noqdaan kuwo isku dhaf ah oo ka kala yimaada dhammaan beelaha degaanka wadaaga.

Waxaanu madaxda dawladda federaalka ah iyo Dowladaha xubnaha ka ah ugu baaqayna in ay dhegaha u furaa codka bulshada oo waxqabadka lagu saleeyo rabitaanka bulshada iyo xaqiiqada ka jirta dalka. Haddii madaxdu ay ka dhega adaygto codka bulshada waxa doorashada iyo hawlaha ka soo baxaa waxa ay noqondoonaan wax aan bulshadu lahayn oo sababi kara nebcaan iyo khilaafaad hor leh.

**Nuur Shire Cismaan
Guddoomiyaha PUNSAA.**

